

## Alberta waxay bilaabysaa Marxaladda 1aad ee u Furnaashaha Qorshaha Xagaaga

Juun 01, 2021

Dadka reer Alberta waxay hadda ku raaxeysan karaan barxadaha banaanka, tima jarka iyo dhaqdhaqaaq badan oo jirka ah maadaama heerarka tallaalka ay sii socdaan inay fuulaan isbitaal dhigiddana ay hoos u dhaceysyo.

Marxaladda 1aad ee marinka 50 boqolkiiba ee reer Alberta oo ay da'dooda 12 iyo wixii ka weyn oo helay ugu yaraan hal qiyaas oo tallaal ah ayaa la qabtay May 18. Si wadajir ahaan, reer Alberta waxay hoos u dhigeen kiisaska waxayna hoos u hayeen isbitaal dhigidda si aad uga hooseeya 800 illaa muddada sugitaanka labada toddobaad ah.

Tallaabooyinka Heerka 1aad isla markiiba waa kuwo dhaqan gala. Waxaa intaa dheer fududeeynta xaddidaadda awoodda adeegyada cibaadada ee bilaabmay 28 kii Maayo.

Saraakiisha ayaa sii wadi doona inay kormeeraan horumarka biixinta tallaalka Alberta iyadoo ay il gaar ah ku hayaan tirooyinka isbitaal dhigidda iyo gudbinta KOOFID-19 ee gobolka.

**Marxaladda 1aad: Laba toddobaad ka dib markii 50 boqolkiiba dadka reer Alberta ee da'dooda 12 iyo wixii ka weyn ay heleen ugu yaraan hal qiyaas oo tallaal ah oo isbitaal dhigidda ay ka hooseysyo 800 oo ay hoosna u dhacayso.**

Laga bilaabo Maayo 28:

- Xaddidnaanta awoodda adeegyada cibaadada waxay u kordheysaa boqolkiiba 15 degganaanshaha xeerka dabka.

Laga bilaabo Juun 1:

- Kulamada bulshada ee bannaanka, iyadoo la fogaanayo, waxay u kordhayaan ilaa 10 qof.
  - Kulamada bulshada ee gudaha weli lama ogola.
- Ku cunidda barxadda bannaanka ayaa dib u bilaabi kara ugu badnaan afar qof miiskiiba.
  - Qof kasta oo miiska fadhiya waa inuu ahaado xubin isku reer ah ama qof kaligiis nool, xafladaha waxay ku eg yihii laba xiriir oo dhow.
- Kala fogaanshaha jirka iyo xayiraadaha kale wali wey socnayaan.
- Jimicsiga bannaanka, waxqabadka iyo waxqabadyada madaddaalada waxaa loo oggol yahay ilaa 10 qof oo kala fog, oo da 'kasta leh.
- Tafaariiqda waxay u kici karaan boqolkiiba 15 degganaanshaha xeerka dabka (waa inay lahaadaan awoodda kala fogeynta).
- Adeegyada gaarka ah iyo fayoqabka ayaa dib loo furi karaa, iyadoo ballan qabsasho kaliya ah.
- Xafladaha arooska waxaa laga yaabaa inay yeeshaan ilaa 10 qof, oo ay ka mid yihii hawladeenka, aroosadda/arooska, markhaatiyaasha iyo sawir qaadayaasha. Soo dhoweynta wali lama ogola.
- Xafladaha aaska waxaa laga yaabaa inay lahaadaan ilaa 20 qof, oo aysan ku jirin shaqaalaha xarunta, wadaadada aaska ama qabanqaabiyeeyasha loo tixgelin maayo inay yihii marti. Soo dhoweynta wali lama ogola.
- Kala fogaanshaha iyo af xirka ayaa wali shaqeynaya.

Iyadoo ku saleysan xawaaraha tallaalka ee hadda jira iyo isbitaal dhigidda ay sii yaraaneysa, Marxaladda 3aad ayaa la filayaa inay bilaabato 10 ka Juun, haddii isbitaal dhigidda ay ka hooseeyso 500 oo ay hoosna u sii dhacayso.

Marxaladda 3aad ayaa la filayaa inay bilaabato dhammaadka Juun ama horraanta Luulyo. Tani waxay ku tiirsan tahay dhammaan dadka reer Albertan oo sii wadaya tallaalka iyo raacidda tallaabooinka caafimaadka dadweynaha ee jira.

Reer Alberta waxay kala socon karaan horumarka talaalka Gobolka ee [alberta.ca](http://alberta.ca).

Gudbinta Gobolka ee KOOFID-19 ayaa sii wadi doona in lala socdo inta dib loo furayo. Haddii loo baahdo, tallaabo dib u furid ayaa la joojin karaa si looga jawaabo isbeddellada gudbinta ee KOOFID-19 ee heerarka deegaanka ama gobollada.

Furitaanka waara wuxuu ku xirnaan doonaa dadka Alberta oo si buuxda loogu tallaalo laba qiyaas inta lagu jiro bilaha xagaaga si looga hortago faafitaanka mustaqbalka ee KOOFID-19.

Dawladda Alberta waxay ka jawaabaysaa faafida KOOFID-19 iyada oo ilaalinaysa nolosha iyo habnololeedka i oo ay tilaaboyin sax ah u mareysa, joogtaynta ganacsiyada yaryar iyo ilaalinta nidaamka daryeelka caafimaadka ee Alberta.

## Xogta la xiriirta

- Alberta ayaa u furan Qorshaha Xagaaga ([Alberta's Open for Summer Plan](http://alberta.ca))

## Weydiimaha warbaahinta

Jerrica Goodwin

587-988-3278

Xoghayaha Saxaafadda, Xafiiska Gudoomiyaha

*Si aad u hesho ilo badan oo dowladda loo turjumay, fadlan booqo: <https://www.alberta.ca/covid-19-translated-resources.aspx>.*